



Munaasabada Ardayda ee Qaboobaha 2022

Waan idin salaanay Waalidiinta, Qoysaska iyo Bulshada FWPS,

Waxaan haysanaa waxyaabo badan oon ku faano haddaan nahay Federal Way Public Schools (Dugsiyada Dadweynaha Federal Way)! Waxaa ku mahadsan shaqaalaheena cajiibka ah, ardayda, qoysaska, iyo iskaashatada bulshada waxaan awoodnay inaan dhabarka u ridano una dulqaadano caqabado badan oo aan la kulanay intaan dib ugusoo laabanayna waxbarashada tooska fasalka loo tagaayo. Dugsiyada keligood shaqada ma qaban karaa—anagoo adeegsanayna dadaal wadajir ah, waxaan ku faraxsan nahay inaan ka warbixinno guulo badan, ayna ku jiraan laakiin aan ku koobnayn:

- Xataa anagoo dhexda uga jirna aafada cudur, ardaydeena ayaa sii waday inay qalin jabiyaan ayagoo wata buundooyin sareeya, ayadoo Fasalka 2021 ay 86% qalin jabiyeen xiliga qalin jabinta.
- Waxaan si guul leh dib ugu laabanay waxbarashada waqtiga buuxa tooska loo tagaayo, anagoo dhaqan gelayna habraacyada caafimaadka iyo badqabka ee dhammaan degmada.
- Waxaan si wayn uga qaybgalnay Shirarka ay Ardaydu Hagayaan, anagoo 90% ka qaybgalnay.
- 1400+ arday ayaa ka qaybgalaysa Dugsiyada STEM Lighthouse.
- 122 arday oo ka qalin jabisay fasalkeena 2021 ayaa qaadatay shahaadada Seal of Biliteracy.
- Waxaan biloownay koorsooyinka cusub ee CTE, ayna ku jiraan barnaamijka tababarka hore ee ganacsiga oo lagu baxsho Dugsiga Sare ee Federal Way.
- 2,038 kamid ah ardayda dugsiga sare ayaa qaadatay koorsada AP, IB, ama Cambridge intii lagu jiray sanad dugsiyeedka 2020-21.
- Sanad dugsiyeedka 2021–22, 2,982 arday ayaa laga diiwana gashay koorsooyinka labada buundo.

Waan ku faraxsan nahay guulahaan, waana ognahay inaan waxyaabo badan oo kale samayn karno intaan sii wadno gaarista yoolalka ku cad qorshaheena istaraatiijiyada. Waxaan wali u taagan nahay inaan sii wadno hormarinta si aan u taageerno guusha ardaydeena aqoon ahaan, iyo dareenka bulshanimadaba. Halkaan ayaad ka helaysaa dhawr qodob oo kooban oo ku saabsan waxa aan samayn doono 2022:

- Maadaama ay yihiin iskaashato muhiim u ah shaqadeena, hogaanka degmada ayaa fikrado ka aruurin doona shaqaalaha, qoysaska, ardayda iyo waxyaabaha loo baahan yahay intaan wadno qorshaha bilaha soo socda, barnaamijiyada xagaaga iyo sanad dugsiyeedka 2022-23.
- Gudiyada talo bixinta ee waalidka/qoyska iyo ardayda ayaa wali sii ahaan doona tiir dhexaadka hormarka degmada.



- Waxaan mardhow qaban donaa shirwaynaha sanadlaha ah ee talo bixinta ardayda, halkaasoo ardayga ka timaada kooxda talo bixinta ee ardayda dugsi kasta, iyo sidoo kale Gudigga Talo Bixinta Ardayda ee Kormeeraha Guud, ay fikrado muhiim ah siin karaan hogaamiyaasha degmada.
- Habaynada Qorshaynta Dugsiga Sare ayaa hadda la qabanayaa ilaa Feebaraayo—ardayda fasalka 8aad ayaa imaan kara xogna ka baran kara waxa laga doonaaya ardayda dugsiga sare.
- Feebaraayo waa bisha Waxbarashada Xirfada iyo Farsamada (CTE), waxaana dulmari doonaa fursadaha waawayn ee ardeenu heli karaan intay qaadanayaan buundooyinka dugsi sare iyo kuleejka, shahaadooyinka shaqada iyo xirfadaha shaqada.
- Mutadawiciinta iyo ururada bulshada ayaa markale lagusoo dhawayn doonaa dhismayaasha! Waxaan ognahay in mid kasta oo kamid ah uu taageero qiimo badan siiyo ardaydeena iyo dugsiyadeena, waxaana ku faraxsan nahay in xogta dadka uu soo rito COVID-19 ay sii yaraato si loosii wado taageerooyinkaan.

Sidoo kale, goordhow, waxaad ku arki doontaa labo isbadal oo lagu samaynaayo canshuuraha codbixinta Feebaraayo 8, 2022: Canshuurta Barnaamijyada iyo Shaqada Waxbarashada (EP&O) iyo Canshuurta Tignooloojiyada. Labadaan canshuurood ayaa maalgelin muhiim ah siinaaya waxyaabaha uusan gobalku maalgelin ee ay kamid yihiin shaqaalaha, barnaamijyada, tignooloojiyada, iyo kaabayaasha muhiimka u ah taageerida ardayda ku dhaqan 37 xarumood ee dugsiga. Kuwaani maaha canshuuro cusub waxayna badali doonaan canshuuraha horay u jiray ee gacanta ka gaysta maalgelinta qaybaha muhiimka ah ee shaqooyinka maalinlaha ah ee dugsiga kuwaasoo waqtigoodu ku egyahay 2022, ayna ku jiraan tignooloojiyada, kaaliyaasha macalimiinta, lataliyaasha, kalkaalisooyinka, ciyaar yahannada, muusiga, iyo waxyaabo kale. Xog dheeraad ah oo ku saabsan canshuurahaan ayaa laga heli karaa wargayskaan iyo barta www.fwps.org/Levies2022.

Biloowga 2022 waa mid wanaagsan, ayadoo ardayda iyo shaqaaluhu dugsiga dib ugu soo laabteen kadib Fasaxa Qaboobaha, waxaana ku faraxsannahay inaan arko waxyaabo wanaagsan oo aan samayn doono inta ka hartay sanad dugsiyeedka! Waxaan kaa codsanaynaa iskaashigaaga joogtada ah anagoo ku dhiiri gelinayna ardaydeena inay buuxshaan dabeecada laga rabo, xasuusinayna ardayda tilmaamaha caafimaadka iyo badqabka, siinaynana taageero aqooneed markay u baahdaan. Waxaan si wanaagsan ku biloownay sanad dugsiyeedka, waxaana ku faraxsannahay inaan sii wadno dedaalkaan.

Iskaashi u dhexeeya,

Dr. Dani Pfeiffer, Ed.D.